



Maalintii aan ka tagay guriga een magalada aaday

- ✎ Lesley Koyi, Ursula Nafula
- 👤 Brian Wambi
- 💬 Abdi Muse
- 🗣️ somali
- 📊 nivå 3



“Magaalada, Magaalada, Waxuu u socdaa Galbeedka!” Ayaan maqalay kirishbooy ku dhawaaqaya. Kaasi ayaa ahaa baskii aan u baahnaa in aan raaco.



Baska magaalada ku dhawaad wuu buuxay, laakiin dad badan ayaa wali isku soo riixaayay in ay in koraan. Qaar baa xamuuulkoodi baska hoostiisa gashaday. Qaar kalena waxay dhigteen mesha kabaha lasaaranayay.



Rakaabka cusub ayaa ruxaayay tikidhadooda markay raadinaayeen meel ay ka fariistaan baska dadku ku badan yihiin. Dumarka haysta caruurta yaryar waxay ku raaxaysan hayeen safar ka dheer.



Waxaan is ku nabay xaga xigto daaqada. Qofka fadhiyay agtayda waxuu si adag u hayay bac cagaaran. Wuxuu soo xidhay kabo duug ah, jaakad dildilaacsan, wuxuuna u muuqday mid aad u xanaaqsan.



Waxaan fiiriyey banaanka baska oo waxaan ogaaday inaan ka tagaayo tuuladayda, meeshii aan ku koray. Waxaan u socday magaalada weyn.



Raritaankii ayaa la dhameeyey, rakaabkii oo dhanne waa la fadhiisiiyay. Wareejiya yaashii wali waxay is ku soo riixahayeen baska si ay oga iibiyaan alaabadooda rakaabka. Qof kasta wuxuu ku qaylinayay magacyada waxa loo diyaariyey iibka. Ereyada ayaa iila muuqday kuwo cajiib ah.



Rakaab yar ayaa iibsaday cabitaan, qaar kalena waxay iibsadeen cunto fudud oo yar yar waxayna bilaabeen inay calaliyaan. Kuwa aan haysan lacag, sida aniga oo kale, way daawanaayeen.



Hawlahani waxaa kala gooyay baska hoonkisa, calaamad muujinayso in aan diyaar u nahay inaan baxno. Rakaabiyihii wuxuu ku qayliyay wareejiya yaashii si ay baska uga dagaan.



Wareejiya yaashii ayaa isku riixay si ay uga dagaan baska. Qaarkood waxay sii yeen baaqigoda rakaabkii. Kuwa kale waxay sameeyeen daqiiqadkii ugu dambeeyey ee iibinta alaabooyin badan.



Sidaas tuu baska uga dhaqaaqay boosteejada baska, waxaan daaqada ka eegay bananka. Waxaan si la yaableh uga fikiray in aan abid kuso laaban doonto tuulada.



Intii safarka sii gudo galnay, gudaha baska ayaa aad u kululaaday. Waxaan is ku xidhay indhaha anigoo rajeynayo in aan seexo.



Laakiin maskaxdayda ayaa dib ugu laabatay guriga. Hooyaday miyay amaan ahan doontaa? Miyuu bakaylahaygu ii gali doona wax lacag ah? Walaalkay miyuu xusuusan doonaa in uu geedahaygi waraabiyo?



Markan jidka sii soconay waxaan sii xifdiyay magaca meesha uu adeerkey kaga noolaa magaalada weyn. Waxaan wali si hoose u sii shekeysan hayay markii aan hurday.



Sagaal saacadood kaddib, waxaan ku toosay buuq weyn iyo wicitanka rakaabkii ku noqonaayay tuuladayda. Waxaan soo qaatay bacdaydi yarayd waana ka boodey baskii.



Baski soo noqonayay ayaa si dhakhso ah u buuxsamaayay. Dkakhso waxuu ku laaban doonaa bariga. Hada waxa iigu muhiimsan waxay ahayd inaan bilaabo raadinta guriga adeerkay.



Barnebøker for Norge

barneboker.no

Maalintii aan ka tagay guriga een magalada aaday

Skrevet av: Lesley Koyi, Ursula Nafula

Illustret av: Brian Wambi

Oversatt av: Abdi Muse

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barneboker.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 4.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/).